IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad Muqdisho, 1 Jennaayo 1978 L. 1

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.**

FAAFINTA BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## K O O B N I I N

### BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 1 ee 26 Disember 77, Meel marin wax ka beddelka labaad ee Heshiiska Aasaaska Ururka Lacagaha Adduunka. » 3

LAW N. 1 on 26 Disember 77, Instrument of ratification Second Amendment of articles of agreement of the International Monetary Fund. » 4

SHARCI L. 2 ee 28 Disember 17, Heshiis Amaahda ee Mashruuca Waxbarashada ee dhex maray J.D.S. iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta (IDA). » 5

LAW N. 2 on 28 Disember 77, The Development Credit Agreement between the S.D.R. and the International Development Association. » 6

### BOGGA LABAAD

### X E E R

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, L. 1 ee 29 Okt. 77, Cad dhul Dawladeed la siiyey Jaalle Shariif Axmed Maxamed Xasan L. 1 » 7

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD L. 2 ee 29 Okt. 77, Dhul Dawladeed la siiyey gacantana loo gelivey Jaalle Ferow Cali Axmed. » 9

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3 ee 29 Okt. 77, Dhul Dawladeed la siiyey gacantana loo geliyey Jaalle Maka Nuur Caddow L. 3 » 11

## BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 14.12.77, Naado Dhul Jaalle Mahdi Ibraahim Kheeyre L. 1 » 13

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 14.12.77, Naado Dhul Jaalle Weli Cabdullaahi Yaasiin L. 2

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 14.12.77, Naado Dhul Jaalle Xafida Dubad Cumar L. 3 » 14

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 14.12.77, Naado Dhul Jaalle Inj. Saciid Naaji Maxamed L. 4

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.12.77, Naado Dhul Jaalle Xaliima Warsame Cali L. 5 » 15

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.12.77, Naado Dhul Jaalle Jaamac Muuse Bile L. 6

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.12.77, Naado Dhul Jaalle Muraayad Cabdi Cali L. 7 » 16

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.12.77, Naado Dhul Jaalle Saciid Xaaji Ismaaciil L. 8

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.12.77, Naado Dhul Jaalle Rashiid Caydiid Muuse L. 9 » 17

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25.12.77, Naado Dhul Jaalle Maxamed Gacal Maxamed L. 10

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 1.7.77, Naado Dhul Jaalle Maxamed Faarax Xuseen L. 11 » 18

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 29.12.77, Naado Dhul Jaalle Cali Xuseen Cabduraxmaan L. 12

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 29.12.77 Bed. Naado Dhul Jaalle Yaxye Cabdullaahi Cali L.13 » 19

WASAARADDA HAWLAHA GUUD. 29.12.77 Bed. Naado Dhul Jaalle Muxyadiin Xaaji Faarax L. 14 » 20

WASAARADDA HAWLAHA GUUD. 29.12.77 Bed. Naado Dhul Jaalle Maryan Maxamed Xuseen L. 15

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYEED 4.12.77, Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad L. 16 » 21

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYEED, 21.12.77, Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad L. 17 » 22

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE 4.11.77, Lumid Jeeg Wareega lam, 052480 uu leeyahay Aadan Isaaq Ibraahim L. 18 » 23

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 8.12.77, Lumid Buugga Kaydka L. 13058 ku qoran Shs. 600,- uu leeyahay Maxamed Muuse Dirir L. 19 » 24

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.12.77, Lumid Buugga Kaydka L. 11453 ku qoran Shs. 20.000/- uu leeyahay Cali Muuse Abuukar L. 20

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 31.12.77, lumid Buugga Kaydka L. 7 ku qoran Shs. 5.144/- uu leeyahay Maxamed Ciid Calasow L. 21 » 25

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 1.1.78, lumid Buugga Kaydka L. 5599 ku qoran Shs. 592 ay leedahay Seynab Cabdi Aadan L. 22

XAFIISKA KAALIYAHA MAXKAMADDA G. BANAADIR, 22.12.77, Tirtiridda L. 23 » 26

CANCELLERIA DEL TRIBUNALE DEL BENADIR, 22.12.77, Cancellazione L. 23 » 27

## BOGGA KOOWAAD

# SHARCI

SHARCI L. 1 ee 26 Dis. 77 Meelmarin wax ka beddelka labaad ee Heshiiska Asaaska Ururka Lacagaha Adduunka (Second Amendment of articles of agreement of the international monetary Fund).

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan Saddexaad ee Kacaanka 21.10.1969.

MARKUU ARKAY: Sharci Lr. 17, 18 iyo 19 ee 1.7.1976.

MARKUU ARKAY: Sharci Lr. 22 ee 6.7.1962.

AYADOO: Loo baahanyahay in J.D.S. meelmariso wax ka beddelka Labaad ee Heshiiska Ururka Lacagaha Adduunka.

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha

Wasiirrada taariikhdu markay ahayd 25.12.77

WUXUU SOO SAARAYAA:

Sharciga soo socda:

### Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday in la meelmariyo wax ka beddelka labaad ee Heshiiska Aasaaska Ururka Lacagaha Adduunka, siduu oggolaaday Golaha Guddoomiyayaasha hay'adda Ururka Lacagaha Adduunka taariikhda 30.4.1976.

### Qodobka 2aad

Heshiiska cusub oo ka xasilay wax ka beddelka labaad ee Heshiiska Ururka Lacagaha Adduunka wuxuu yeelan doonaa astaan sharci ah, wuxuuna ka mid noqon doonaa sharciyada looga dhaqmo dalka J.D.S.

### Qodobka 3aad

Heshiiska cusubi wuxuu dhaqan geli doonaa markaa 60% ee dalalka xubnaha ka ah Ururka Lacagaha Adduunka oo leh 80% awoodda codka (Voting Power) ay meel mariyaan isla heshiiskaan.

Muqdisho, 26 Dis 1977.

Madaxweynaha
Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

LAW No. 1 of 26 Dis 77, Instrument of ratification

THE PRESIDENT OF THE SOMALI DEM. REPUBLIC

HAVING SEEN : The first, second and third charters of the Revolution of 21st October 1969;

HAVING SEEN : Law Nos. 17, 18 and 19 of 1st July 1976;

HAVING SEEN Law No. 22 of 6th July 1962;

TAKING NOTE : of the approval of the Political Committee and the Council of Ministeries; on 25.12.1977

PROMULGATES

The following law :

Article 1

The Second Amendment of the Articles of Agreement of the International Monetary Fund as approved by the Board of Governors on 30 April 1976 is hereby ratified.

Article 2

The proposed Second Amendments of the Articles of Agreement of the International Monetary Fund shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic.

Article 3

The Second Amendments shall become effective when it has been accepted by the 60% (three-fifths) of the members of International Monetary Fund having 80% (four-fifths) of the total voting power.

Mogadishu, 25.12.1977.

Jaalle Maxamed Siad Barre

The President of SDR

SHARCI L. 2 ee 28 Disember 77, Heshiis Amaahda ee Mashruuca Waxbarashada ee dhexmaray J.D.S. iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta (IDA).

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaankii 21ka Oktoobar, 1969.

ISAGOO ARKAY: Sharciyada tirsigoodu yahay 1, 17, 18 iyo 19 ee

soo baxay 1dii Luulyo, 1976.

ISAGOO ARKAY: Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta (I.D.A.), kuna saabsan Mashruuca Waxbarashada (Third

Education Project), lana saxeexay 30kii Sebtembar, 1977, (Columbia).

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada ee 22kii Diseembar, 1977.

WUXUU SOO SAARAYAA:

Sharciga soo socda:

Qodobka I

Heshiiska Amaahda ee Mashruuca Waxbarashada ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta (I.D.A.) laguna saxeexay (Columbia) 30kii Sebtembar, 1977 waa la meelmariyey.

Qodobka II

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muq. 28 Dis, 77

Madaxweynaha

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya

Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre

LAW N. 2 on 28 Dis. 77 The Development Credit Agreement between the S.D.R. and the International Development Association.

THE PRESIDENT

OF THE SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

HAVING SEEN : The 1st, 2nd, and 3rd Charter of October 21st Revolution 1969.

HAVING SEEN : The law No. 1, 17, 18 and 19 of 1st July 1976

HAVING SEEN : The Development Credit Agreement (Third Education Project) between the Somali Democratic Republic and the International Development Association (IDA), signed on 30th September, 1977 (Columbia)

TAKING NOTE : of the approval of the Political Bureau the Council of Ministers; on 22.12.1977
Hereby promulgates the following law :

Article I

The Development Credit Agreement between the Somali Democratic Republic and the International Development Association, signed on 30th September, 1977 at Columbia, is hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic, and shall be published in the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

MAG. GEN. MOHAMED SIAD BARRE

PRESIDENT OF THE

SOMALI DEM. REPUBLIC

## BOGGA LABAAD

## X E E R

XEER W.H.G. L. 1 ee 29 Okt. 77, Cad dhul Dowladeed la siiyey JAALLE SHARIIF AXMED MAXAMED XUSEEN - ku yaal Muqdisho - Degmada Hodan - kuna fadhiya mq. 630.

## WASIIRKA

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ISAGOO ARKAY : Warqaddii koowaad, labaad iyo tan saddexaad ee Kacaanka 21ka Octobar 1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. yihiin 17, 18, 19 soo baxday 1da Luulyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegay XHKS.

ISAGOO ARKAY : Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxday 13kii Septeembar 1973;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 144 soona baxday 23 Maajo 1961;

ISAGOO ARKAY : Arjigii uu keensaday Tenente Maxamed Nuur taariikhdeeduna ahayd 5 Agoosto 1958, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho - Degmada Hodan;

ISAGOO AQOONSAN : Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana looga dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda lamb. soona baxday iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. 4355, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar, fadhigoodii 269aad taariikhdeeduna ahayd 10 Abriile 1961, kuna saabsan dhismo Guri.

ISAGOO ARKAY : Boleetada lamb. 5171 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in MOXAMED NUUR uu bixiyey lacag dhan Shs. 630/- kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO AQOONSAN : Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 1.260/- loona tiriyey MAXAMED NUUR sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 22 Oktoobar 1961;

ISAGOO ARKAY : Warqadda ku qoran qaynuunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaameysa dhulka isaga ah;

ISAGOO ARKAY: Qoraal (ATTO) lamb. 180 Rep. taariikh. 15.7.68, lagu diiwaan geliyey Xamar 15.7.1968 lamb. 521 Atti Pubblici Vol. 18 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Xasan Warsame Cali taas oo MAXAMED NUUR MAXAMED ka gaday kuna wareejiyey XAAJI MAXAMUUD DHORE FAARAX wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 630/- kuna yaal Muqdisho - Degmada Hodan;

ISAGOO ARKAY: Qoraal (ATTO) lamb. 1840 Reb. taariikh. 3.1.72 lagu diiwaan geliyey Xamar 8.1.1972 al n. 19 Atti Pubblici Vol. 20 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Benvenuto Franceski taas oo MAXAMUUD DHOORRE FAARAX ka gaday kuna wareejiyey Dott. MAXAMUUD MAXAMED CUSMAAN FAARAX wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 630/- kuna yaal Muqdisho Degmada Hodan.

ISAGOO ARKAY: Qoraal (ATTO) lamb. 13810 Reb. taariikh. 21 Agoosto 1974 lagu diiwaan geliyay Xamar 21.9.1974 lamb. 281 Atti Pubblici Vol. 20 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Xasan Warsame Cali taas oo qareen MAXAMUUD MAXAMED CUSMAAN ka gaday kuna wareejiyay AXMED IIMAAN MAXAMED wax allaale wixii xuquuq ah oo k usaabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 630/ kuna yaal Muqdisho – Degmada Hodan;

ISAGOO ARKAY: Qoraal (ATTO) lamb. 6272 Reb. taariih. 8.1.76 lagu diiwaan geliyey Xamar 15.11.1976 al n. 340 Atti Pubblici Vol. 21 oo ah caddeynta Notaayada Dr. MAXAMED XASAN JASTI taas oo AXMED IIMAAN MAXAMED ka gaday kuna wareejiyey SHARIIF AXMED MAXAMED XUSEEN wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 630/- kuna yaal Muqdisho - Degmada Hodan;

XEER

A°) Waxaa cad dhul Dowladeed ah gatay Jaalle SHARIIF AXMED MAXAMED XUSEEN oo ku yaal Muqdisho - Degmada Hodan, kuna fadhiya mq. 630.

B°) Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Nuur Maxamed la siiyay uuna gatay dhul Dowladeed ee ku fadhiya mq. 630/- kuna yaal Muqdisho - Degmada Hodan.

Muqdisho, 29 Okt. 1977.

WASIIRKA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
W.S. Inj. Maxamed Xawaadle Madar

NUQUL

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 37
Muqdisho, 5 Nof. 1977
Hantidhawrka Guud
W.S. G/le Sare Cabdullaahi Warsame Nuur.

XEER W.H.G. L. 2 ee 20 Okt. 1977 Dhul Dowladeed la siiyey gacantana loo geliyey Jaalle FEROW CALI AXMED ku yaal Muqdisho - Degmada Hodan kuna fadhiya mq. 1.500.

WASIIRKA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ISAGOO ARKAY: Warqaddii koowaad, labaad iyo tan saddexaad ee Kacaanka 21ka Octobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. yihiin 17 18, 19 soo baxday 1da Luulyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed.

ISAGOO ARKAY: Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxday 13kii Septeembar 1973;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 6 soona baxday 9 Jannaayo 1967;

ISAGOO ARKAY: Arjigii uu keensaday FEROW CALI AXMED taariikhdu markay ahayd 5.8.1975, kuna weydiisatay dhismo cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho - Degmada Hodan;

ISAGOO AQOONSAN: Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana looga dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda lamb. 9 ee 1da Sebteembar 1975, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda lamb. 538, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar, fadhigoodii 12aad taariikhdeeduna ahayd 23.5.1977, kuna saabsan dhismo Guri;

ISAGOO ARKAY: Bolleetada lamb. yihiin 626836 ee 8.6.1977 iyo lamb. 611635 ee 14.6.1977 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban taas oo caddeyneysa in FEROW CALI AXMED uu bixiyey lacag dhan Sh. So. 1.500/- kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO ARKAY: Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 1.500/- loona tiriyey FEROW CALI AXMED sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 8.6.1977;

ISAGOO ARKAY: Xaqiijinta Farsamada ka tirsan Waaxda Dhismaha iyo Dhulka, taariikhdeeduna aheyd 19.6.1977 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Guddiga dhismaha ee W.H.G. ee Xamar lamb. 538 ee 23.5.1977 laguna xaqiijiyey sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay.

ISAGOO ARKAY: Oggolaanta Nulla Osta) dagganaashada Guriga ku dhisan Xamar degmada HODAN, laguna siiyey xaashid lamb. 1956 ee 30 Luulyo 1977 taas oo caddeyneysa in naqshadda iyo dhismaha iswaafaqsan tahay;

ISAGOO AQOONSAN: In la tixgeliyey wax allaale wixii waajib ahaa kuna saabsan siismada iyo gacan u gelinta dhismahaas ku yaal cadka dhulka Dowladda (Concessione e consegnente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saarayaa;

XEER

Waxaa dhul Dowladeed la siiyey, gacanta loo geliyey, loona aqoonsaday FEROW CALI AXMED, dhul ku fadhiya mq. 1.500/- kuna yaal Muqdisho - Degmada HODAN.

Muqdisho, 29 Okt. 1977

WASIIRKA

WASAARADDA HAWLAHA GUU

W.S. Inj. Maxamed Xawaadle Madar

NUQUL

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 36

Muqdisho, 5 Nof. 1977

Hantidhawrka Guud

W.S. G/le Sare Cabdullaahi Warsame Nuur.

XEER L. 3 ee 29.10.1977 Dhul Dowladeed la siiyey, gacantana loo geliyey Jaalle MAKA NUUR CADDOW - ku yaal Muqdisho - Degmada Hawl - Wadaag - kuna fadhiya mq. 196.

WASIIRKA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ISAGOO ARKAY: Warqaddii koowaad, labaad iyo tan saddexaad ee Kacaanka 21ka Octobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. yihiin 17, 18, 19 soo baxday 1da Luulyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxday 13kii Septeembar 1973;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 6 soona baxday 9 Jennaayo 1967;

ISAGOO ARKAY: Arjigii uu keensatay Jaalle MAKA NUUR CADDOW taariikhdu markay ahayd 12.4.1977, kuna weydiisatay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho - Degmada Hawl-Wadaag;

ISAGOO AQOONSAN: Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyey looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda

ISAGOO ARKAY: Naqshadda lamb. 716, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Wasaaradda Hawlaha Guud ee Xamar, fadhigoodii 12aad taariikhdeeduna aheyd 7.7.1977, kuna saabsan dhismo Guri;

ISAGOO ARKAY: Bolleetada lamb. 653926 ee 9.7.1977, kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in MAKA NUUR CADDOW uu bixisay lacag dhan Sh. So. 196/- kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO ARKAY: Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 196/- loona tiriyey MAKA NUUR CADDOW sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada Dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 14.7.1977;

ISAGOO ARKAY: Warqadda ku qoran qaynuunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaameyso dhulka isaga ah;

ISAGOO ARKAY : Xaqiijinta Farsamada ka tirsan Waaxda Dhismaha iyo Dhulka, taariikhdeeduna aheyd 20.8.1977 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Guddiga dhismaha ee W.H.G. ee Xamar, lamb. 716 ee 23.6.1977 laguna xaqiijiyey sida ay naqshaddu Guriga waafaqsan tahay ;

ISAGOO ARKAY : Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaanshaha Guriga ku dhisan Xamar degmada Hawl-Wadaag, laguna siiyey xaashida lamb. 2145 ee 7 Agoosto 1977 taas oo caddeyneysa in naqshadda iyo dhismaha guriga iswaafaqsan tahay ;

ISAGOO AQOONSAN : In la tixgeliyey wax allaale wixii waajib ahaa kuna saabsan siismada iyo gacan u gelinta dhismahaas ku yaal cadka dhulka Dowladda (Concessione e consegnente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saarayaa;

XEER

Waxaa dhul Dowladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday MAKA NUUR CADDOW, dhul ku fadhiya mq. 196/-kuna yaal Muqdisho - Degmada Hawl-Wadaag.

Muqdisho, 29 Okt. 1977.

WASIIRKA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
W.S. Inj. Maxamed Xawaadle Madar

N U Q U L

Waan aragnay ee Diiwaangelinay

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 35

Muqdisho, 5 Nof. 1977

Hantidhawrka Guud

W.S, G/le Sare Cabdullaahi Warsame Nuur.

## BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD
### WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Mahdi Ibraahim Kheeyre uu soo qortey Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 16.6.77 uu ku weydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar degmada Hodan qaabkiisuna yahay Retaangolo Addimihiisuna yihiin 13.50×13.50 kuna fadhiya 182.25/- Mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman :

Waqooyi waxaa ka xiga : Cali Maxamed
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Maxamed Khaliif
B a r i waxaa ka xiga : Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 14 Dish. 1977

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj Caydaruus C. Keenadiid

L. 1

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O D H U L

Waxaa la caddeeynayaa in Jaalle Welli Cabdullaahi Yaasiin u soo qortey Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 26.4.77 uu ku weydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar degmada Hodan qaabkiisuna yahay Retaangolo Addimihiisuna yihiin 20×30 kuna fadhiyo 600/- Mdh: Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman :

Waqooyi waxaa ka xiga : Jid
Koonfur waxaa ka xiga : Dhul lam. 445
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul lam, 442
B a r i waxaa ka xiga : Dhul lam. 446

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 14 Dish. 1977

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj Caydaruus C. Keenadiid

L. 2

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xafida Dubad Cumar u soo qortey Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 21.5.77 ay ku weydiisanaysey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar degmada Hodan qaabiisuna yahay Retaangolo Addimihiisuna yihiin 30×20 kuna fadhiyo 600/- Mdh: Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga : Jid
Koonfur waxaa ka xiga : Jid
Galbeed waxaa ka xiga : Jid
Bari waxaa ka xiga : Dhul lam. 119K

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 14 Dish. 1977

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj Caydaruus C. Keenadiid

L. 3

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Inj. Saciid Naaji Maxamed u soo qortey Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 2.7.73 uu ku weydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar degmada Hodan, Qaabkiisuna yahay 20×20 Addimihiisuna yihiin 20×20 kuna fadhiya 400 Mdh: Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman :

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul lam. 36
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul lam. 41
Bari waxaa ka xiga : Dhul lam. 43

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 14 Dish. 1977

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj Caydaruus C. Keenadiid

L. 4

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaliima Warsame Cali u soo qortey Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 30.12.75 uu ku weydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar degmada Hodan Qaabkiisuna yahay Retaangolo Addimihiisuna yihiin 17×13,50 kuna fadhiyo 364,50 Mdh: Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman :

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Cabdiraxmaan iyo Maxamed Weyrax
Bari waxaa ka xiga : 26ka Juun

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 25 Dish. 1977

L. 5

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj Caydaruus C. Keenadiid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Jaamac Muuse Bile u soo qortey Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 17.3.77 uu ku weydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar degmada Hodan Qaabkiisuna yahay Retaangolo, Addimihiisuna yihiin 30×20 kuna fadhiyo 600/- Mdh: Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman :

Waqooyi waxaa ka xiga : Jid
Koonfur waxaa ka xiga : Dhul lam. 153K.
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul lam. 450K
Bari waxaa ka xiga : Dhul lam. 454K

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 25 Dish. 1977

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj Caydaruus C. Keenadiid

L. 6

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Muraayad Cabdi Cali u soo qortey Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 10.6.76 ay ku weydiisanaysey gabal dhu Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar degmada Hodan Qaabkiisuna yahay Retaangolo Addimihiisuna yihiin 60×20 kuna fadhiyo 1200/- Mdh: Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman :

Waqooyi waxaa ka xiga :
Koonfur waxaa ka xiga : Jid
Galbeed waxaa ka xiga : Jid
B a r i waxaa ka xiga : Jid

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 25 Dish. 1977

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj Caydaruus C. Keenadiid

L. 7

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

Waxaala caddeynayaa in Jaalle Sacdiya Xaaji Ismaaciil u soo qortey Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 22.9.76 uu ku weydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar degmada Hodan Qaabkiisuna yahay Retaangolo Addimihiisuna yihiin 30×20 kuna fadhiyo 600/- Mdh: Soohdimihiisuna yihiin sida oos ku tilmaaman :

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul lam. 14 K
Koonfur waxaa ka xiga : Jid
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul lam. 1 K
B a r i waxaa ka xiga : Dhul lam. 3 K

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. xaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 25 Dish. 1977

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj Caydaruus C. Keenadiid

L. 8

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O  D H U L

Waxaa la cadeynayaa in Jaalle Rashiid Caydiid Muuse u soo qortey Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 24.3.77 uu ku weydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar degmada Hodan Qaabkiisuna yahay Retaangolo Addimihiisuna yihiin 30×20 kuna fadhiyo 600/- Mdh: Soohdimihiisuna yihiin sida oos ku tilmaaman :

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga :Dhul lam. 121 K
B a r i waxaa ka xiga : Dhul lam. 123 K

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 25 Dish. 1977

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj Caydaruus C. Keenadiid

L. 9

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Gacal Maxamed iyo Cali Gacal u soo qorteen Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 10.7.77 uu ku weydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaaladatan Xamar degmada Shibis Qaabkiisuna yahay Afar gees Addimihiisuna yihiin 20×20 kuna fadhiyo 400/- Mdh Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman :

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Sheekh Shariif Sheekh
Galbeed waxaa ka xiga : Xaaji Cumar Raage
B a r i waxaa ka xiga : Xaaji Cumar Raage

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 25 Dish. 1977

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj Caydaruus C. Keenadiid

L. 10

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

XAFIISKA MAAMULKA D/HOOSE & H.R.M.

DEGMADA AFGOOYE

NAADO DHUL

OGEYSIIS

Waxaa la ogeysiinayaa in Jaalle Maxamed Faarax Xuseen iyo Faaduma Cusmaan Ibraahim oo deggan Degmada Afgooye Xaafadda Xaawa Taako ay soo weydiisteen inay dhistaan dhul dhan 11,50×11,50 kaas oo ku yaala Xaafadda Xaawa Taako, Soohdimihiisuna waa sida hoos ku dhigan :

Waqooyi waxaa ka xiga : Jid
Bari waxaa ka xiga : Jid
Koonfur waxaa ka xiga : Xuseen Macallin Maracadde
Galbeed waxaa ka xiga : Xaajiya Aamina Nuur.

Sidaas darteed, waxaa la idin ogeysiinayaa dhammaan Dadweynaha qofkii dood ka qaba isla markaana uu sheeganayo inuu leeyahay waa in uu soo qortaa arji ku saabsan inuu dood ka qabo dhulkaasi oo ay soo weydiisteen labada Jaalle ogeysiiskanj wuxuu ku eg yahay 30.7.1977, soddonkaas casho wixii ka dambeeya haddaan aan dood laga keenin dhulkaas waxaa la siinayaa Jaallayaasha soo weydiisteen dhulka dhan 12×12.

Afgooye 1.7.1977

Maamulaha D/Hoose & H.R.M ee Degmada
Jaalle Axmed Mooge Aadan

NUQUL

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Xuseen Cabduraxmaan u soo qortey Arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 27.4.68 uu ku weydiisanayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar degmada Hodan Qaabkiisuna yahay Retaangolo Addimihiisuna yihiin 30×20 kuna fadhiyo 600/-Mdh: Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman :

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul lam. 013 K
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Waddo
Bari waxaa ka xiga : Dhul lam. 239 K

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican ugu arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalintii lagu soo qorey Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 29 Dish. 1977

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj. Xuseen Cabdi Maxamed

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## BEDDELAAD DHAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Yaxya Cabdullaahi Cali maalintii taariikdu ahayd 10.12.62 loona oggolaaday

Waxaa la ceddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Muxiyaddiin Xaaji Faarax loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan Qaabkiisuna ahaa Retaangolo Addimihiisuna ahaayeen 30×10 kuna fadhiya 300/- Mdh: looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Hawl-Wadaag Jidka sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 437/36 oo ka baxday xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman ;

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu k uyaal Muqdisho degmada Hawl-Wadaag Jidka

Qaabkiisuna waa Retaangolo Addimihiisuna yihiin 30×40 kuna fadhiya 1200/- Mdh: Soohdimihusuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul lam.70

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

B a r i waxaa ka xiga : Dhul lam 68

Muqdisho, 29 Dish. 1977

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA

Inj. Xuseen Cabdi Maxamed

L. 13

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Muxiyaddiin Xaaji Faarax maalintii 13.9.1966 loona oggolaaday oo ku yaal Muqdisho degmada Hodan Qaabkiisuna ahaa Afar Gees Addimihiisuna ahaayeen 30×10 kuna fadhiyo 300/- Mdh: looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Hawl Wadaa Jidka Hawl Wadaag sidaas awgeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa BF/1288/267/77 oo ka baxday xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman :

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga gaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Hawl Wadaag Jidka Hawl Wadaag Qaabkiisuna waa Retaangolo Addimihiisuna yihiin 30×40 kuna fadhiya 1200/- Mdh: Soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul lam. 103
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Waddo
Bari waxaa ka xiga : Dhul lam. 107

Muqdisho, 29 Dish. 1977

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA
Inj. Caydaruus C. Keenadiid

L. 14

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii ay soo weydiisatay Jaalle Maryan Maxamed Xuseen maalintii taariikhdu ahayd 5.8.73 loona oggolaaday oo ku yaal Muqdisho - Degmada Hodan Jidka
uu iska beddelay cabbirkii hore qaabkiisu ahaa Afar Gees Addimihiisuna ahaayeen 20×20 kuna fadhiya mq. 100/- sababtoo ah QORSHAHA dhulka oo is beddelay. Sidaas aawadeed Naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG. 3.23.867. Taariikhdu 29.8.73 kana baxday Xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman :

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo Jaallahaas qaabkiisuna waa Retaangolo Addimihiisuna yihiin 30×20 kuna fadhiya mq. 600 soohdimihiisuan yihiin sida soo socota :

Waqooyi waxaa ka xiga : Jid
Koonfur waxaa ka xiga : Dhul lam. 50
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul lam. 25
Bari waxaa ka xiga : Dhul lam 49

Muqdisho, 29 Dish. 1977

AGAASIMAHA W. DHISMAHA IYO DHULKA

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

XEERNIDAAMIYE LAMBAR 110 EE 4.12.77

UJEEDDO : Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.

GUDDOOMIYAHA IYO AGAASIMAHA GUUD
EE BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKAY ARKEEN : Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Seteembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadjhinta Ganacsiga Dibedda ee awood siinaya BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna.

AYAGOO TIXGELINAYA : Isbeddelka qiimaha lacagaha qalaad ee saamaynaya ganacsiga dunida, sida joogto ahaan naga soo gaarta Suuqa Sarrifka Caalamiga ah.

MARKII LA GARTAY : In la daryeelo ganacsiga iyo danaha kale ee dhaqaalaha waddankeenna.

AYAGOO OGSOON : In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 239 ee 4.12.77 sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lambar 27 26kii Nofeembar, 1968, uu dhigayo.

WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka sarrifka lacagha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga bilaabo 5.12.77 waxaa go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

| Lacagta Qalaad | | Heerka iib. oo Shs. ah | Heerka Gadidda oo Shs. ah |
|---|---|---|---|
| US$ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK£ | 1.00 | 11.3866 | 11.6144 |
| D.M. | 1.00 | 2.9155 | 2.9738 |
| LIT. | 141.49 | 1.0000 | ——— |
| LIT. | 138.66 | ——— | 1.0000 |
| FR. FR. | 1.00 | 1.2879 | 1.3137 |
| SW. FR. | 1.00 | 2.8882 | 2.9460 |
| DJ. FR. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Agaasimaha Guud
Bankiga Dhexe ee Soomaaliya
(Saciid Max'ed Cali)

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

XEER NIDAAMIYE lam. 111 ee 21.12.77

UJEEDDO : Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.

GUDDOOMIYAHA IYO AGAASIMAHA GUUD

EE BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKAY ARKEEN : Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Seteembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadjhinta Ganacsiga Dibedda ee awood siinaya BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna.

AYAGOO TIXGELINAYA : Isbeddelka qiimaha lacagaha qalaad ee saamaynaya ganacsiga dunida, sida joogto ahaan naga soo gaarta Suuqa Sarrifka Caalamiga ah.

MARKII LA GARTAY : In la daryeelo ganacsiga iyo danaha kale ee dhaqaalaha waddankeenna.

AYAGOO OGSOON : In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 239 ee 21..12.77 sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya lambar 27 26kii Nofeembar, 1968, uu dhigayo.

WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka sarrifka lacagha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata laga bilaabo 22.12.77 waxaa go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

| Lacagta Qalaad | | Heerka iib. oo Shs. ah | Heerka Gadidda oo Shs. ah |
|---|---|---|---|
| US$ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK£ | 1.00 | 11.3866 | 11.6144 |
| D.M. | 1.00 | 2.9155 | 2.9738 |
| LIT. | 141.49 | 1.0000 | ——— |
| LIT. | 138.66 | ——— | 1.0000 |
| FR. FR. | 1.00 | 1.2879 | 1.3137 |
| SW. FR. | 1.00 | 3.0326 | 3.0933 |
| DJ. FR. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Bankiga Dhexe Soomaaliya
(Saciid Max'ed Cali)

(Cumar Ax'ed Cumar)
Guddoomiyaha

Agaasimaha Guud

L. 17

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. J. HOOSE

HADDUU ARKAY : Codsigii AADEN ISAAQ IBRAAHIM waxay ku saabsan tahay ogeysiiskii BANKIGA GANACSIGA EE XAMAR LAANTA SADDEXAAD.

MARKUU OGAADAY : in ay tahay Shaqa Xafiiskiisa;

HADDUU ARKAY : qodobka 69 Xeer L. 9 soona baxay 9.9.1965 lambar 2.

WAXAA LA CADDEYNAYAA :

Dhumidda Jeeg wareegto L. 052480 taariikh 16.10.77 kuna qoran Lacag dhan 5.400 (Shan kun afarboqol) Shs.

WAXAA LA AMRAYAA :

In loo cusbooneysiiyo Jeeg wareegto uu ka dhumay AADEN ISAAQ IBRAAHIM muddo 15 (Shan iyo toban) beri ah oo laga bilaabo markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah, haddaan la helin qof kale oo Jeegaas sheegta.

WAXAA KALOO la caddeynayaa in jeegaas gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qof kale oo ka sita Wakaalad aan shaki ku jirin.

Kismaayo, 4.11.1977

GUDDOOMIYAHA

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE
Dr. Xuseen Faarax Hilowle

L. 18

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : dacwadda kor ku qoran ;
MARKUU ARKAY : waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY : qod. 69 D.L. 9.9.65 N. 2; lumidda Buugga Kaydka lam. yahay 13058 oo ay ku qoran tahay Sh. So. 600/- Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 2aad.

WUXUU AMRAYAA :

In loo cusbooneysiiyo Bugga Keydka kaddib markii ay ka soo wareegto 30 (soddon) maalmood maalinta dekreetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA :

In Buugga cusub la sameyn doono gacanta la saaro Maxamed Muuse Dirir ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30 (soddon) maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

GUDDOOMIYAHA MAK. GOB. BANAADIR
W.S. Cabdullaahi Daahir Barre

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : dacwadda kor ku qoran ;

MARKUU ARKAY : waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY : qod. 69 D.L. 9.9.65 N. 2; lumidda Buugga Keydka lam. 11453 oy ku qoran tahay Sh. So. 20.000/- Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 1aad.

WUXUU AMRAYAA :

In loo cusbooneysiiyo Buugga Keydka kaddib markii ay ka soo wareegto 30 (soddon) maalmood maalinta dekreetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA :

In Buugga cusub ee la sameyn doono gacanta la saaro Cali Muuse Abuukar ama qof ilsa asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30 (soddon) maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay

Muqdisho, 29.12.77

GUDDOOMIYAHA MAK. GOB. BANAADIR

W.S. Cabdullaahi Daahir Barre

L. 20

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : dacwadda kor ku qoran ;

MARKUU ARKAY : waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY : qod. 69 D.L. 9.9.65 N. 2; lumidda Buugga Keydka lam. 11453 oy ku qoran tahay Sh. So. 5.144 Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 4aadii

WUXUU AMRAYAA :

In loo cusbooneysiiyo Buugga Keydka kaddib markii ay ka soo wareegto 30 (soddon) maalmood maalinta dekreetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA :

In jeegaga cusub ee la sameyn doono gacanta la saaro Maxamed Ciid Calasow ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30 (soddon) maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 31.12.77.

GUDDOOMIYAHA MAK. GOB. BANAADIR

W.S. Cabdullaahi Daahir Barre

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : dacwadda kor ku qoran ;

MARKUU ARKAY : waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY : qod. 69 D.L. 9.9.65 N. 2; lumidda Buugga Keydka lam. yahay 5599 oy ku qoran tahay Sh. So. 592/. Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Dhexe.

WUXUU AMRAYAA :

In loo cusbooneysiiyo Buugga Keydka kaddib markii ay ka soo wareegto 30 (soddon) maalmood maalinta dekreetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA :

In Buugga cusub ee la sameyn doono gacanta la saaro Seynab Cabdi Aadan ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo mudda 30 (soddon) maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay

Muqdisho, 1.1.78

GUDDOOMIYAHA MAK. GOB. BANAADI

W.S. Cabdullaahi Daahir Barre

L. 22

XAFIISKA KAALIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

T I R T I R I D D A

Waxaan caddeynayaa in Shirkadda Nukleare Soomala S.p.A. ku dhigneed Lam. 796 Xigidda Lam. 1311 diiwaan shirkadaha, sida sharciga uu qabo in la soo' hordhigay aatooyinka taariikhda 20.12.77 Baabi'inta (Liquidatori) oo ah Shirkadda Nukleare Somala S.p.A. Xafiiska Kaaliyaha, wuxuu caddeynayaa in laga tirtiray diiwaanka Shirkadaha.

KAALIYAHA MAX. GOBOLKA BANAADIR

Xamar, 22 Dish. 1977

L. 23

NUKLEARE SOMALA

Allegato «C»

Società per Azioni «Shirkadda Sahmiyeesan» oo iminkadan la baabi'inaayo («in liquidazione») Saldhigeeduna yahay Muqdisho, Raasumaalkeeduna ah Shs. 1.000.000 - giddi ahaan lawada dhigay.

MIISAANIYADDA UGU DAMBEYNTA BAABI'INTA

ILAA 30 NOFEMBER 1977

| | | |
|---|---|---|
| HANTIDA (ATTIVO) | | |
| Khasaarada Guud | Shs. So. | 51.500.941,17 |
| laga jaray : | | |
| Raasumaalka | » | 1.000.000.00 |
| Khasaaro Guud ka timid Hawlwadidda | Shs. So. | 50.500.941,17 |

KHASAARO (PASSIVO)

Deynsiyeyaasha :
AGIP S.p.A. Attività Minerarie

| | | |
|---|---|---|
| San Donato Milanese | Shs. So. | 50.500.941,17 |

Khasaaro dhan ee ka timid hawlwadidda giddi ahaan waxay tahay mid misileysa deynta (Rappresentata del credito) AGIP S.p.A. Attività Minerarie-San Donato Milanese (Italiya).

HAWLWADEENE (LIQUIDATORI)

EMILIO PACCHIAROTTI — ADOLFO TURCHI

GUDDIGA BAARAYAASHA (Collegio Sindacali)

RENZO GUIDI — GUIDO PEREGO

VITTORIO QUAGLIA

REPUBBLICA DEMOCRATICA SOMALA

CANCELLERIA DEL TRIBUNALE DEL BENADIR

CANCELLAZIONE

Si dichiara che la società Nucleare Somala S.p.A. iscritta al N. 795 Rep. 1311 del Registro delle Società, in base agli atti depositati in data 20.12.77 dai liquidatori della Nucleare Somala S.p.A. presso questo Cancelleria, é stata regolarmente cancellata dal Registro della Società.

Mogadiscio, 22 Dicembre 1977

CANCELLERIA DEL TRIBUNALE
DEL BENADIR

Allegato «C»

NUCLEARE SOMALA

Società per Azioni - In Liquidazione - Sede in Mogadiscio - Capitale Sociale Shs. So. 1.000.000 int. Versato.

---

BILANCIO FINALE DI LIQUIDAZIONE

AL 30 NOVEMBRE 1977

A T T I V O

| | | |
|---|---|---|
| Perdita complessiva | Sh. So. | 51.500.941,17 |
| meno : | | |
| Capitale sociale | » | 1.000.000,00 |
| Perdita netta di gestione | Sh. So. | 50.500.941,17 |

P A S S I V O

Creditori

— AGIP S.p.A. - Attività Minerarie
San Donato Milanese Sh. So. 50.500.941,17

La perdita netta di gestione é pertanto interamente rappresentata dal credito dell'AGIP S.p.A. - Attività Minerarie - San Donato Milanese (Italia).

I Liquidatori

Emilio Pacchiarotti — Adolfo Turchi

Il Collegio Sindacale

Renzo Guidi — Guido Perego

L. 23